UNIVERSITY OF MINNESOTA
Driven to Discover®

Ogeysiiska Dhaqanada Asturnaanta

Macluumaadkaaga Xuquuqdaada Masuuliyadahayaga

Ogeysiiskani wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaadkaaga loo isticmaali karo loona shaacin doono iyo sida aad u heli karto macluumaadkan. Fadlan si taxadar leh u dib-ugu-eeg.

Xuquuqdaada

Waxaad leedahay xuquuqo gaar ah oo ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga.

Qaybtani waxay sharaxaysaa xuquuqdaada iyo qaar kamid ah masuuliyadahayaga si ay kuu caawiyaan.

Hel nuqulka elektarooniga ah ama ka warqada ah ee diiwaankaaga caafimaad:
Waxaad codsan kartaa inaad aragto ama aad hesho nuqulka elektarooniga ah ama ka warqada ah ee diiwaankaaga caafimaad iyo macluumaadka kale ee caafimaadka ee aan kaa hayno. Waxaa laga yaabaa inaan lacag khidmad ah kaa qaadno codsiyada qaarkood. Xaalado xaddidan qaarkood waxaa laga yaabaa inaan diidno codsiga. Haddii aan diidno codsigaaga waxaad codsan kartaa dib-u-eegista go'aankayaga.

Naga codso inaanu saxno diiwaankaaga caafimaad:
Waxaad naga codsan kartaa inaan saxno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ee aad u maleyneyso inuu khalad yahay ama aanuu dhameystirnayn. Waxaan dhihi karnaa "maya" codsigaaga, laakiin waxaan ku siin doonaa bayaan qoraal ah oo sharaxaya go'aankayaga.

Codso xiriirada qarsoodiga ah:
Waxaad naga codsan kartaa inaan kuula soo xiriirno qaab gaar ah (tusaale ahaan, telefanka guriga ama xafiiska) ama inaan boostada u dirno cinwaan ka duwan [kan imika]. Waxaan dhihi doonaa "haa" dhamaan codsiyada macquulka ah.

Naga codso inaan xadidno waxa aan u isticmaalno ama wadaagno:
Waxaad naga codsan kartaa inaanan isticmaalin ama wadaagin macluumaadka caafimaadka ee daaweynta, lacag bixinta, ama hawlahayaga. Lanoogama baahna inaan oggolaano codsigaaga, waxaana laga yaabaa inaan nidhaahno "maya" haddii ay saameyn doonto daryeelkaaga.

Haddii aad jeebkaaga ka bixiso kharashka adeega ama qalabka daryeelka caafimaadka, waxaad naga codsan kartaa inaanan macluumaadkaas la wadaagin caymiskaaga caafimaadka ujeedada lacag bixinta ama hawlaha awgood. Waxaan dhihi doonaa "haa" haddii uu sharcigu nagu amrayo inaan wadaagno macluumaadkaas mooyee.

Hel liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadka:

Waxaad naga codsan kartaa liiska waqtiyada aan wadaagnay, cida aan la wadaagnay, iyo sababta aan ula wadaagnay macluumaadka caafimaadkaaga. Waxaad codsan kartaa wakhti cayiman inuu liisku sheego, laakiin ma bixin doonno wax macluumaad ah oo ka badan 6 sanno kahor codsigaaga. Liiska kuma jiri doonaan wixii wadaag ah ee lagu fuliyay codsigaaga ama daaweynta, bixinta lacagta, hawlaha daryeelka caafimaadka ama xaalado kale qaarkood. Waxaan bixin doonaa hal liis oo bilaash ah laakiin waxaan kaa qaadi doonaa lacag haddii aad codsato liis kale 12 bilood gudahood. Si aad u heshid liistada waxaad codsi qoraal ah u dirtaa cinwaanka ku yaala dhamaadka ogeysiiskan.

Haddii aad dareentid in xuquuqdaada lagu xad gudbay, soo gudbi cabasho:
Waxaad ka caban kartaa haddaad dareento inaan ku xadgudbnay xuquuqdaada. Waxaad isticmaali kartaa macluumaadka xiriirka ee ku yaala dhamaadka ogeysiiskan si aad u sameyso cabashadaada.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka si aad u cabato.

Kaagama aargoosan doono wixii cabashooyin ah ee aad naga gudbiso.

Hel nuqul kamid ah ogeysiiskan asturnaanta:
Waxaad naga codsan kartaa nuqulka warqada ah ee ogeysiiskan waqti kasta, xitaa haddii aad oggolaatay inaad si qaab elektaroonik ah ku hesho. Waxaad ka codsan kartaa nuqulka warqada ah ee goobahayaga shaqada, ama waxaad u diri kartaa codsi qoraal ah cinwaanka ku yaala dhamaadka ogeysiiskan.

Masuuliyadahayaga

Waxaan leenahay masuuliyadaha macluumaadka caafimaadkaaga.

Sharciga ayaa naga raba inaan ilaalino asturnaanta iyo amniga macluumaadka caafimaadkaaga ee la dhowro, iyo inaanu ku wargalino haddii ay jirto jebinta macluumaadka caafimaadkaaga ee aan amaanka ahayn. Waa inaan raacnaa waajibaadka iyo dhaqanada asturnaanta ee lagu sharaxay ogeysiiskan waana inaan ku siinaa nuqul kamid ah. Uma isticmaali doono ama wadaagi doono macluumaadkaaga si ka duwan sida lagu qeexay ogeysiiskan haddii aad na siiso oggolaansho mooyee. Haddii aanaan hore tallaabo uga qaadin oggolaanshahaaga, waxaad dib u qaadan kartaa ama ka noqon kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta adoo noo soo qoraya warqad oo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee ku yaala dhamaadka ogeysiiskan.

Isticmaalkayaga iyo Shaacintayada:

Sidee ayaan caadiyan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadka caafimaadkaaga?

Waxaan caadiyan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadka caafimaadkaaga hababkan soo socda.

Daaweyntaada:
Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadka caafimaadkaaga si aan kuu daweyno, laakiin sharciga Minnesota wuxuu naga donayaa in aan helno oggolaanshahaaga ka hor inta aanan la

wadaagin macluumaadkaaga xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee rugaha kale ee ku daaweynaya.

Tusaale: Dhakhtar rug kale kaaga daaweynaya dhaawac ayaa naga codsaday taariikhdaada caafimaad. Sharciga Minnesota wuxuu nooga baahan yahay inaan helno oggolaanshahaaga qoran kahor inta aanaan wadaagin macluumaadkan.

Maareynta hay'adayada:
Waxa laga yaabaa inaan isticmaalno oo aan wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aan u maareyno xirfadayada, u hagaajino daryeelkaaga, iyo kuula soo xiriirno markii loo baahdo. Waxa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga la wadaagno shuraakada shaqada ee loo yaqaan "iskaashatada shaqada" kuwaas oo naga caawiya inaanu maamulno oo aanu maareyno hawlahayaga.

Tusaale: Waxaan u isticmaalnaa macluumaadka caafimaadkaaga si aan u maareyno daaweyntaada iyo adeegyadaada.

Soo daalacida lacagta adeegyadaada:
Sharciga Minnesota ayaa naga doonaya inaan helno oggolaanshahaaga kahor inta aan isticmaalnin ama wadaagin macluumaadka caafimaadkaaga si aan ugu daalacno biilka ama uga helno lacag bixinta qorshayaasha caafimaadka ama hay'adaha kale ee daaweyntaada.

Tusaale: Qorshahaaga caafimaadka ayaa nagula soo xiriiray lacag bixinta adeegyada. Sharciga Minnesota wuxuu naga doonayaa inaan helno oggolaanshahaaga ka hor intaanan wax macluumaad ah siin qorshahaaga caafimaad si uu u bixiyo kharashyada adeegyada aan ku siinay.

Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadkaaga?

Waxa lanoo oggol yahay, mararka qaarna lanaga doonayaa, inaan macluumaadkaaga siyaabo kale u wadaagno - badanaa siyaabo gacan ka geysanaya danta dadweynaha, sida caafimaadka bulshada iyo cilmi baarista. Waa inaan buuxinaa shuruudo badan oo sharciga ah kahor inta aanaan macluumaadkaaga u wadaagin ujeedooyinkaas.

Ka caawinta arrimaha caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha:
Waxaa laga yaabaa in aan wadaagno macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan xaaladaha qaarkood sida ka hortagga cudur, caawimada dib u soo celinta alaabta, ka warbixinta dareen-celinta daran ee daawooyinka, ka warbixinta xadgudubka, dayaca, ama rabshada guriga, ka hortagga ama yaraynta halista daran ee caafimaadka ama amniga qof, ama si loo yareeyo halis daran oo degdeg oo ku imanaysa caafimaadka ama amniga guud.

Sameynta cilmi-baaris:
Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga cilmi-baaristayada caafimaadka waxaana laga yaabaa inay macluumaadkaaga la wadaagno cilmi-baarayaasha qalaad haddii aadan diidin.

U hoggaansamida sharciga:

Waxanu wadaagi doonaa macluumaadkaaga haddii sharciyada gobolka ama federaalku ay u baahan yihiin, oo ay ku jiraan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha haddii ay rabto inay hubiso inaan u hoggaansameyno sharciga federaaliga ah ee asturnaanta.

Ka jawaabida codsiyada deeqda:
Waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaadka ururada gubdiya xubnaha iyo unugyada.

La shaqeynta baaraha sababta dhimashada:
Waxa laga yaabaa in aan macluumaadka caafimaadka la wadaagno baaraha sababta dhimashada ama baare caafimaad marka uu qof dhinto.

Ka jawaabno dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga ah:
Waxa laga yaabaa inaanu wadaagno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan anagoo ka jawaabayna maxkamad ama amar maamul, amar maxkamadeed, codsi raadin ama hab kale oo sharci ah.

Magdhowga shaqaalaha cinwaanka, fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dowladda:

Waxaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan:
Sheegashooyinka magdhawga shaqaalaha.

Ujeeddooyinka fulinta sharciga ama sarkaalka sharci fulinta sida uu sharcigu farayo.

Hay'adaha kormeerka caafimaadka ee qabanaya howlaha uu sharcigu oggol yahay.

Hawlaha gaarka ah ee dawladda sida militariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha sida sharciga looga baahan yahay.

Doorashooyinkaaga:

Macluumaadka caafimaadka qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad doorato waxa aan wadaagno:

Noo sheeg haddii aad leedahay doorbidid ku saabsan sida aan u wadaagno macluumaadkaaga xaaladaha hoos ku xusan, waxaanu raaci doonaa tilmaamahaaga.

Xaaladahan, waxaad leedahay xuquuqda iyo doorashada inaad noo sheegto inaan:

- Macluumaadka la wadaagno qoyskaaga, asxaabtaada dhaw, ama kuwa kale ee ku lug leh daryeelkaaga.
- Wadaagno macluumaadkaaga ku saabsan xaaladaha gargaarka musiibada.

Haddii aadan awoodin inaad noo sheegto doorbidkaaga, tusaale ahaan haddii aad miyir beeshay, waxaanu go'aansan karnaa inaanu wadaagno macluumaadkaaga haddii aanu rumaysanahay in ay tahay dantaada ugu fiican. Waxa kale oo laga yaabaa inaan macluumaadkaaga wadaagno marka loo baahdo in la yareeyo halis daran oo degdeg ah oo ku iman karta caafimaadka ama amniga.

Xaaladahan marnaba ma wadaagno macluumaadkaaga haddii aadan na siinin oggolaansho qoraal ah ama aan buuxino shuruudo gaar ah:

Ujeedooyinka suuqgeynta:
Oggolaanshahaaga la'aantii, marka keliya ee aan u isticmaali karno ama u wadaagi karno macluumaadkaaga ujeedooyinka suuq-geynta waa marka si gaar ah loogu oggolaaday sharciga, sida la kulankaaga waji ka waji ama siinta hadiyada.

Iibinta macluumaadkaaga:
Oggolaanshahaaga la'aantii, marka keliya oo aan u isticmaali karno ama u wadaagi karno macluumaadkaaga macaamil ganacsi waa marka si khaas ah loogu oggolaaday sharciga, sida iibinta hawlgalka ganacsi oo dhan.

Wadaagida ugu badan qoraallada caafimaadka dhimirka:
Oggolaanshahaaga la'aantii, marka kaliya ee aan isticmaali karno ama wadaagi karno qoraallada caafimaadka dhimirka waa marka sharcigu u baahan yahay ama si gaar ah u fasaxayo, markay yihiin arrin khuseeya tallaabo sharci ah oo aad keentay adigu, ay la xiriiraan daaweynta, bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka, ama xaalado kale oo xadidan sida kormeerka bixiyahaaga daaweynta.

Xaaladda lacag ururinta:
Waxa laga yaabaa inaan kuula soo xiriirno dedaalka lacag ururinta awgood, laakiin waxaad noo sheegi kartaa inaanan mar dambe kula soo xiriirin.

Taariikhda uu Dhaqan Galay iyo Wax ka beddelka Shuruudaha Ogeysiiskan:
Taariikhda uu dhaqan galay ogeysiiskani waa Febraayo 1, 2019. Waxa laga yaabaa inaan beddelno shuruudaha ogeysiiskan, isbedelkuna wuxuu ku dabaqmi doonaa dhamaan macluumaadka aan kaa hayno. Ogeysiiska cusub ayaa laga heli doonaa marka la codsado xarumahayaga, iyo boggayaga internetka.

Ogeysiiskan Dhaqanada Asturnaanta wuxuu khuseeyaa dhamaan xarumaha Jaamacada Minnesota ee bixiya adeegyo daryeel caafimaad ee gudbiya macaamilada elektaroonigga ah si loogu soo daalaco biilka adeegyadaas, oo ay ku jiraan:

- Adeegyada Caafimaadka Boynton
- Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Jaamacada Bulshada (CUHCC)
- Xarunta Hadalka-Luqada-Maqalka ee Julia M. Davis
- Rugta Ardayda Dugsiga Caafimaadka Ilkaha, Rugaha Daryeelka Dhameyskatiran,
- Ruagaha Dhakhaatiirta Carruurta & Takhasuska ee Maxaliga ah
- Adeegyada Caafimaadka ee UMD

Ogeysiiskan ayaa laga yaabaa inuu khuseeyo xaruamaha kale ee Jaamacada Minnesota ee aan kor lagu xusin. Xarumahaas ayaa ogeysiiskan ku siin doona haddii ay ku habboon tahay.

Ogeysiiskani ma khuseeyo Xarunta Caafimaadka ee Jaamacada Minnesota, Fairview, ama xarumaha lagu magacaabo M Health.